*Falanqeyn - 11/may/2025*

# *Farriinta Mareykanka: Amniga Siyaasadda ku Xiran! Xaalku ma xishood beelay ?*

Laba jumlad oo 31 eray oo 206 xaraf ka kooban ayuu Mareykanku ku sheegay waxa uu oggolyahay, waxa uu diidan yahay iyo sida uu xalku yahay, si loo soo afjaro hubanti la'aanta siyaasadeed ee Soomaaliya soo wajahday. Farriinta waaxda Afrika ee Wasaaradda Arrimaha Dibadda Mareykanka uga jawaabtay war-murtiyeedkii GWQ waxay xambaarsanayd farriimo isku karis ah oo siyaasadda iyo amniga isku sidkaayo.

***1-*** Erayga saamileyda siyaasadeed ee baryaahan su'aashu ka taagnayd waxa uu Mareykanu ku soo kordhiyay ***"Saamileyda ay khuseyso"***, taas oo u muuqata inay ku soo dareyso musharraxiinta madaxweynenimo iyo madaxda Dowlad Goboleedyada ay xurguftu kala dhaxeyso madaxweynaha Federaalka.

***2- Cod ku yeelasho:*** Waxaa meesha ka baxaayo in talada mucaaradka la dhageysto oo kaliya oo arrinku waxa uu isku bedalay inay go'aanka wax ka yeeshaan, meeshaan waxaa loo socdaa go'aamo ***"wadar ogol"*** ah.

***3- Nidaamka Federaalka Soomaaliya*** iyo xuduudaha waxaa kaalin weyn ku lahaa IGAD, sida loo sawiray Dowlad Goboleedyadana waa arrin ay daneeynayaan dowlado waaweyn, soo kordhinta dowlad goboleed cusub, kala qeybinta kuwo horay u jiray iyo dhismaha maamul cusub go'aankeeda waa lala leeyahay Villa Somalia, waxa hadda dhacayna dowladda Mareykanka ma aqoonsana.

***4- Nidaamka Doorashooyinka*** oo ka billaabanaayo wax ka bedelka dastuurka, shuruucda doorashooyinka, dhismaha guddiga iyo fulinta howsha doorashada waa in go'aankeeda loo dhamaadaa, waxa hadda socdana Mareykanku ma aqoonsana.

Jumladda labaad ee qoraalka Mareykanka waxay hoosta ka xarriiqeysaa jabnaanta sharciyadda go'aamada aan la isku raacsanayn waxayna sharraxeysaa natiijooyinka ka dhalan kara haddii Villa Somalia ku adkeysato go'aamadeedii hore.

***1- "Go'aamada la qaatay ee aan la isku raacin ma laha sharciyad"*** oo macnaheedu yahay mareykanku ma aqoonsana, mana taageeri doono.

***2- Haddii la iska indho tiro farriintaanna,*** waxay saameyn toos ah ku yeelan doontaa taageerada amni ee Mareykanku siiyo dowladda Soomaaliya. ***Haddii aad rabto inaad go'aamo kuu gaar ah gaarto, isku tasho.***

Farriintaan ayaa noqoneyso tii ugu adkayd ee abid dowladda Mareykanka si toos ah ugu dirto Villa Somalia, waxaana la aaminsan yahay inay ka dhalatay natiijo la'aanta kulamo dublamaasiyadeed oo uu Mareykanku la yeeshay madaxda dowladda Soomaaliya.